




Home Link - Somali



Home Links Xiriirinta Guriga Cutubka 6aad: Waxyaabaha Kora: Todobaadka 4

Qoysaska Qaaliga ah: Cutubkan ilmahaagu wuxuu wax ka baran doonaa waxyaabaha kora. Isku day ugu yaraan saddex ka mid ah hawlaha waxbarasho ee xiisaha leh, ama dhamaantood samee! Waxa ugu muhiimsan waa inaad ku raaxaysato wakhti yar oo cunugaagu wax ka baranayo waxa ka dhacaya fasalka. Fadlan midabee gudaha sanduuqyada hawlaha aad doorato, kuna soo celi foomkan dugsiga Isniinta soo socota. **XARAABEYSO!**

Magaca Ilmaha: _____

<p style="text-align: center;"><u>Qorista/Akhrinta</u></p> <p>Gabay: Wada akhriya Tani waa gabay ay tahay in ilmahaagu barto.</p> <p style="text-align: center;">Five Eggs and Five Eggs Five eggs and five eggs, that makes ten. Sitting on top is a mother hen. Crackly, crackle, crackle, What do you see? Ten yellow chicks, fluffy as can be. - <i>Anonymous</i></p>	<p style="text-align: center;"><u>Lugada</u></p> <p>Qorista iyo Sawirida: (La xiriira <i>Make Way for Ducklings</i>)</p> <p>Ku martiqaad ilmahaaga si aad u sawirtid safarkaagii Beerta Dadweynaha. Ka caawi inuu calaamadeeyo sawirka.</p> <p>Bilaabayaasha Wadahadalka:</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Maxaad ku xasuusataa booqashadeenii Beerta Dadweynaha? ● Xagee kamid ah Beerta ayay bolonbooladu go'aansadeen inay ku noolaadaan dhamaadkii sheekada? Waa maxay sababtu?
<p style="text-align: center;"><u>Hadal iyo Akhris (20 Dagiigo)</u></p> <p>Bilaawayaasha Wadahadalka:</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Maxaad u maleyneysaa in buuggani uu noqon doono? ● Waa maxay qeybta aad ugu jeceshahay sheekada? ● Waa maxay waxa ugu horreeya ee ka dhaca sheekada? ● Maxaad u maleyneysaa inay dhici doonto marka xigta? ● Waa ayo matalaha aad jeceshahay? 	<p style="text-align: center;"><u>Daahfur</u></p> <p>Safarka Beerta Dadweynaha: (La xiriira <i>Make Way for Ducklings</i>)</p> <p>U safar Beerta Dadweynaha adigoo raacaya gaadiidka dadweynaha (khada cas ee taga Park St. ama khadka cagaaran ee taga Arlington). Dhex lugee beerta. Raadi sawirada taalooyinka qoyska Mallard oo kala hadal ilmahaaga wixii faahfaahin ah ee uu ka xasuusto sheekada <i>Make Way For Ducklings</i>.</p>

Xisaabta

Ciyaarta Isbarbardhiga ee Walxaha: Samee laba weel oo ay ku jiraan 20 shay oo yaryar (sida qadaadiic, furarka dhalada, dhagaxyada, iwm.). Ciyaaryahan kastaa wuxuu cantoobo buuxda uga qaadanayaa walxaha, wuxuu furayaa gacmahiisa, waxaanuu eegayaa inta uu ku heysto dhinac kasta, waanuu isku darayaa. Kala hadal lambarka yar iyo lambarka weyn.

Bilaabayaasha Wadahadalka:

- Sidee ku ogaan kartaa cidda heysata in badan?
- Miyuu _____ ka badan yahay _____?

Diiwaanka Akhrinta

Calaamadee maalin kasta adiga iyo cunugaaga aad sheeko wada akhrisaan. Buugaagtu waxay noqon karaan Af Ingiriis ama luuqada gurigaaga. Booqo maktabadda dadweynaha ee xaafaddaada si aad u hesho buugaag badan oo ku saabsan waxyaabaha koraya.

Isniin _____ Talaado _____ Arbaco _____ Khamiis _____ Jimco _____ Sabti _____ Axad _____

Buugaga aan ku akhrino dugsigu:

Make Way for Ducklings
oo ay qoray Robert McCloskey

Buugaag kale adiga iyo ilmahaaga laga yaabo in aadjeclaataan:

Have You Seen My Duckling?
oo ay qoray Nancy Tafuri

Tallooyinka si Wadajir ah u Akhrinta:

- Wada fadhiista meel xasiloon oo degan.
- Marka aad akhrinayso, iftiimi oo qeex erayada cusub. Tusaale ahaan, “**Ducklings** waa ilmaha yar ee bolonboolada.”
- Marka aad akhrinayso, weydii ilmahaaga su'aalaha ku saabsan buugga. Tusaale ahaan, “Haddii sarkaalka bilaysku aanu joogin meesha sidee ayay carruurta bolonbooladu uga gudbi lahaayeen wadada?”